# Golaha Wakiilladda

## Waaxda Hadal-qoraalka, Shuruucda iyo Daabacaada

***Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhiga 10aad ee Fadhigii 2aad***

*30 November 2024*

**Quraanka:** Md. Axmed Dayib Aadam (ku-cadeey)

**Gudoonka: -** Yaasiin Maxamuud XIir (Faratoon)

**Ajandaha Fadhiga: -** *Warbixinta Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Tiknolojiyada ee ee Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah.*

**Guddoomiyaha:-** Alle ha inagu anfaco aayadaha Quraanka, Xildhibaannadkana Ilaahay ha ka abaalmariyo. Mudanayaal, saaka waxa inala jooga Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyada, si uu uga warbixiyo Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyada Tiknoolajiyadda Casriga ah. Xeerka waa la idiin qaybin doonaa. Ujeeddadu waa in aynu marka hore fahanno xeerka, siyaasadda uu ku dhisan yahay, iyo baahida ka dambaysa, si Wasiirku inoogu faahfaahiyo. Intaa ka dib, waxa loo gudbin doonaa guddida ku habboon. Mudane Wasiir, ku soo dhawoow.

**Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyada Md. Axmad Yuusuf Idiris: -** Bismillaahi. Shir-guddoonka, xubnaha sharafta leh ee Golaha, Xoghaynta Golaha, Saxaafadda iyo martida kale dhammaantiin, marka hore Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Sida aad la wada socotaan, adduunku waxa uu ku jiraa isbeddel degdeg ah oo loo guurayo dhinaca tiknoolajiyada. Si aynu ula jaanqaadno dunida casriga ah, waxa lagama maarmaan ah in wixii inagu soo kordha loo sameeyo xeerar, xaddidaad iyo aasaas sharciyeed (foundation).

Mudadii saddexda sanno ee u dambaysay, Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadu waxay ku hawlanayd diyaarinta xeerar la jaanqaadaya dhaqankeenna iyo horumarka tiknoolajiyada. Xeerarkaasi waxa ka mid ah xeerka aynu maanta u fadhinno, kaas oo ah Xeerka Ilaalinta Xogta Elektaroonigga ah iyo Dembiyada Tiknoolajiyadda Casriga ah, xeerkaas oo ka soo gudbay Golaha Xukuumadda kana soo gaadhay Golaha Wakiillada.

Maanta waxaan idin siinayaa warbixin kooban (brief) oo ku saabsan sababta xeerkan loo asaasay, muhiimadda uu u leeyahay qaranka, iyo faa'iidada uu u leeyahay bulshada guud ahaan. Xeerkani waxa uu muhiimad gaar ah u leeyahay ilaalinta xogta shakhsiga ah iyo tan qaranka, iyo in la helo hannaan sharci ah oo lagu xukumo cid kasta oo ku kacda dembi la xidhiidha elektaroonigga, sida foojari, haraasmayn, in qof sawir ama muuqaal laga qaado lana si khaldan loo isticmaalo, ama xog been-abuur ah la faafiyo.

Xeerarkani waxa uu saldhig u yahay bahda garsoorka qaranka, maadaama marka xeerkan la ansixiyo la heli doono wax lagu xukumo qof kasta oo ku kaca dembi tiknoolajiyadeed. Sida aad la socotaan, sannadihii u dambeeyay hay'adaha amniga ee dalku waxay ururiyeen xog badan, taas oo haddii aan sharci lagu xakamayn si khaldan loo adeegsan karo. Waxaan xasuusan karnaa dhacdooyinkii sannadkii 2022-kii ee sawirro dad laga qaaday si khaldan loo isticmaalay. Marka xeerkan la ansixiyo oo uu dhaafo golayaasha kale, waxa la heli doonaa hannaan sharci ah oo lagu wajaho dembi kasta oo tiknoolajiyadeed.

Xeerkani waa xeer aad u muhiim ah, kana faa'iido badan dhinacyo badan, haday tahay qaran ahaan, shakhsi ahaan, shirkado ahaan, iyo guud ahaan Somaliland oo dhan.

Intii aan joogay Wasaaradda, waxaan helnay nuqulka xeerkan oo hore u yaallay, waxaana go'aansanay inaan dib-u-eegis ballaadhan ku samayno. Waxaanu casuunnay dhammaan daneeyayaasha xeerkan, gaar ahaan shirkadaha waaweyn ee dalka ka hawlgala, waxaana la wadaagnay xeerka si ay talooyin uga soo jeediyaan. Wixii ay soo jeediyeena waanu ku daray. Sidoo kale, waxaanu mar labaad casuunnay hay'adaha caalamiga ah, waanu la shirnay, waxaanu u bandhignay nuqulka xeerka, talooyinkii ay soo jeediyeenna waanu ku daray. Sidaas darteed, dhammaan talooyinkii daneeyayaasha waanu ku dabaqnay xeerka.

Xeerkani waxa kale oo uu si gaar ah u ilaalinayaa xogta shakhsiga ah, sida sawirrada iyo muuqaallada la duubo, si aan si khaldan loo isticmaalin, taas oo qusaysa xildhibaannada, wasiirrada, iyo dhammaan muwaadiniinta. Marka xeerkan la helo, waxa suurtagal noqonaya in si sharci ah loo xukumo cid kasta oo ku xadgudubta qof, shirkad, ama hay'ad qaran iyo mid gaar ahba.

Xeerkani waxa uu si toos ah ula xidhiidhaa amniga qaranka iyo horumarka dhaqaale. Waxa kale oo Golaha horyaalla xeer kale oo la yidhaahdo **Data Protection Act**, kaas oo isna muhiim u ah hay'adaha dawliga ah.

Wasaaraddu 25-ka May ee sannadkan waxay heshiis la gashay Dawladda Taiwan si ay inoogu dhisto Xarunta Qaranka ee Kaydinta Xogta (National Data Center). Xaruntani waxay suurto-gelin doontaa in xogta dawladdu meel dhexe ku ururto, server-rada la keeno, shaqaalahana la tababaro. Qaar ka mid ah shaqaalaha ayaa hadda Master ka wada dalkaas, qaar kalena tababaro ayay ka soo qaateen. Xaruntani waxay noqon doontaa Cyber Security and Data Protection Center uu qaranku yeesho, waana arrin aad u muhiima.

Haddii xeerkan la ansixiyo, waxa uu saldhig u noqon doonaa xaruntaas, maadaama xaruntii la dhisayo, shaqaalihii la tababarayo, iyo xeerkii lagu maamulayay ay dhammaantood is waafaqayaan, taas oo ah tallaabo mudan in la bogaadiyo.

Waxaanu maanta idiinka fadhinaa talooyin iyo wax-ku-daris, idinkuna aad ku biirisaan xeerkan. Ansixinta xeerkan waa masuuliyad qaran oo inagu wada waajib ah.

Waad mahadsan tihiin. Wixii su'aalo ah, aniga iyo kooxda farsamada ee ila socotaa waanu ka jawaabi doonnaa. Wabillaahi Towfiiq.

**Guddoomiyaha**

Haddii ay jiraan su'aalo ama faahfaahin dheeraad ah, waa la waydiin karaa Wasiirka. Xeerka waxa loo gudbin doonaa guddida, ka dibna dood ayaa laga yeelan doonaa. Maanta waxa aynu diiradda saaraynaa su'aalaha fahamka iyo faahfaahinta.

Waxaan ku bilaabaynaa Xildhibaan Cabdikariim Aadam Cali.

**Xildhibaan Cabdikariim Aadam Cali: - Su'aal,** Mahadsanid Guddoomiye iyo Shir-guddoon. Waxaan salaamayaa xubnaha sharafta leh ee Golaha.

Mudane Wasiir, dalka waxa ku badan biraha dhaadheer (towers) ee shirkadaha isgaadhsiinta, kuwaas oo laga dhisay magaalooyinka iyo tuulooyinkaba. Ma jirtaa cilmi-baadhis arrintaas ku saabsan oo xeerkan ku jirta, mise waa mid ka madax-bannaan?

Sidoo kale, arrin protocol ah ayaan ku saxayaa Mudane Wasiir: dhammaan Xildhibaannadu waa mudanayaal, mana habboona in dhalinyaro iyo waayeel lagu kala saaro. Waad mahadsan tahay.

**Wasiirka Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyada Md. Axmad Yuusuf: - jawaab,** Mahadsanid mar labaad. Wasaaraddu waxay cilmi-baadhis ku samaysay biraha dhaadheer (towers), gaar ahaan kuwa ku yaalla magaalada Hargeysa. Cilmi-baadhistaas waxa lagu soo bandhigay shir-weynihii ICT-ga.

Marka shirkaduhu dhisayaan tower, waxa jira xeer-nidaamiye iyo hannaan (procedure) la raaco. Tower lama dhisi karo iyada oo aan Wasaaradda Isgaadhsiinta loo soo gudbin. Wasaaraddu waxay dirtaa koox qiimaysa goobta—iyadoo la eegayo u dhowaanshaha goobaha la deggan yahay, goobaha waxbarashada, xarumaha caafimaadka, iyo meelaha jiifka. Dadka waxa ku jira cabsi la xidhiidha towers-ka, balse Wasaarad ahaan waxa aanu haysannaa qalab lagu cabbiro badbaadada goobta iyo saamaynta ay yeelan karto.

Waxaana filayaa in foobiyada laga qabo iyo siday wax u jiraan ay kala duwan yihiin. Injineerkii iyo qoladii farsamada (technical) ee arrintan ku hawlan way joogaan, wixii ka soo baxay cilmi-baadhistaasna haddii aad u baahataan, bogga (page-ka) Wasaaradda waa laga heli karaa. Shirkad walba waxaanu u samaynay waxa loo yaqaan tower profiling intii aan joogay. Shirkad kasta waxa la diiwaangeliyey tirada tower-rada ay ku leedahay dalka, ha ahaato tuulo, miyi ama magaalo. Waxaanu sidoo kale mustaqbalka ka fikiraynay inaanu samayno infrastructure sharing, si la mid ah sida fiilooyinka (cables) loo wadaago, in tower-radana loo wadaago.

Marka sidaas awgeed, ma jiro tower si iskii ah loo taago. Shirkad walba codsi ayay soo gudbisaa, codsigaas waa la eegaayaa, goobta waa la tagayaa, waa la qiimaynayaa. Waxaannu leenahay gaadhi iyo qalab aanu ku cabbirno, sidaas darteedna fikirka laga qabo iyo siday wax u jiraan way kala duwan yihiin.

Taas intaas ayaan kaga baxayaa. Arrinta protocol-kana waan qaatay. Haddii aan xildhibaanada da'dooda ka hadlayna, waxaan ula jeedaa inta aanu isku da'da nahay, cid gaar ahna uma jeedin.

**Md. Xasan Kayse – Su'aal: -** Maaddaama dadku ay dareenkaas wada qabaan, adiguna aad sheegtay inaad soo eegtaan oo aanay wax dhibaato ah tower-radu lahayn, maxaad caddeyn u haysaa in aanay wax dhibaato ah lahayn? Radiation

baa laga cawdaa, marka faahfaahi waxa aad ku caddaynaysaan in aanay dhibaato lahayn.

Wasiirka Isgaadhsiinta Md. Axmad Yuusuf – Jawaab: Mudane Xildhibaan, anagu dhinaca farsamada (technical) ayaan ka hadlaynaa. Adigu noo sheeg waxa dhibaato u aragtaan. Arrimaha caafimaadku waxay hoos yimaaddaan Wasaaradda Caafimaadka, halka arrimaha farsamaduna ay hoos yimaaddaan Wasaaraddayada. Sida ku qoran xeer-nidaamiyaha Wasaaradda, tower lama taago ilaa la soo eego, mana noqon karto mid meel la deggan yahay u dhow, waxaana ku xusan masaafadda ay u jirayaan goobaha deggenaanshaha.

Md. Xasan Kayse – Su'aal: Mudane Wasiir, jawaabta aad na siisay ma aha mid ay dadweynuhu ku qanci karaan, sidaas darteed fadlan dib ugu noqo oo faahfaahi.

**Guddoomiyaha**

Arrinta xeerka iyo wixii ku jira uun baynu ku ekaanaynaa, arrimaha kale aynu mar kale ka dhigno.

**Wasiirka Isgaadhsiinta Md. Axmad Yuusuf:** Mudane Xildhibaan, waxaan kaa codsan lahaa haddii aad u baahan tahay in si faahfaahsan laguu caddeeyo, inaad Wasaaradda noogu timaaddo si aanu si fiican kuugu soo bandhigno. Maanta hawl baa inoo taal, "oodo dhacameed siday u kala sarreeyaan baa loo kala guraa," bay Soomaalidu tidhaahdaa. Maanta hawshan aynu dhamaystirno. Haddii aad u baahato, waxaad igu soo casuumi kartaa barnaamijka La Hadal Dadkaaga. Xeer baa inoo yaalla, kan aynu marka hore dhamaystirno, wixii xeerkan la xidhiidha i waydii, Mudane Xildhibaan.

**Md. Axmed-yaasiin Maxamed Xassan – Su'aal:** Guddoomiye, Mudanayaasha Golaha, Shaqaalaha Golaha, Saxaafadda, Wasiirka iyo xubnaha saraakiisha la socota, dhammaantiin ASC.

Mudane Wasiir, aad baad ugu mahadsan tahay imaatinkaaga, waana ku bogaadinaynaa inaad noo timaaddo adigoo xeer sidan u miisaan culus wada, inkasta oo aanu weli akhriyin.

Maaddaama aynu ka hadlayno Xeerka Cyber Security Act, shirkadaheenna dhinaca dhaqaalaha sida Zaad iyo Edahab, dadku wax dammaanad ah ma haystaan, caalamkana inta aan shaqo la bilaabin sharci ayaa la sameeyaa, innaguna taas ma dhicin. Marka maanta oo aynu ka hadlayno cyber security, ma

ku jirtaa in marka aan lacag ku shubto Zaad ama Edahab ay jirto wax dammaanad ah oo lacagtayda ah?

Su'aashayda labaad, ganacsiga online-ka aad buu u soo badanayaa waddankeena. Xagga copyright-ka iyo ilaalintiisaba ma ku jiraa xeerkan?

Su'aasha saddexaad, shirkadaha isgaadhsiintu isma galaan. Iyaga laftooda, haddii aanay arrintaasi xeerka ku jirin, maxaa idiinka qorshaysan?

**Wasiirka Isgaadhsiinta Md. Axmad Yuusuf – Jawaab:** Haddii aan ka bilaabo su'aasha u dambaysa, inter-connection-ku wuu jiraa. Labada shirkadood ee waaweyn heshiis bay galeen; haddii aad Telesom ka garaacdo Somtel oo lacag kugu jirto, way is-galayaan, farriimaha (text messages)-kana way isu diri karaan. Taasi waa heshiis ay wada gaadheen shirkadaha iyo Wasaaraddu.

Arrinta ***Zaad, Edahab ama Cash+,*** waa muhiim in la kala fahmo. Wasaaraddu waxay ka masuul tahay infrastructure-ka. Marka ay noqoto digital money, Bangiga Dhexe ayaa iska leh, xeerkiisuna waa la wadaa. Anagu waxaannu leenahay infrastructure-ka, qof kasta xogtiisa, sawirkiisa ama wixii laga qoray haddii la koobiyeeyo, xeerku wuu qeexayaa wixii lagu xukumi lahaa. Laakiin lacagaha dijitaalka ah Bangiga Dhexe ayaa iska leh.

Su'aasha ku saabsan online market-ka, haddii qof leeyahay ganacsi online ah oo cid kale si khaldan u isticmaasho, waxa la eegayaa aqoonsiga (identity-ga), wixii lagu xukumayayna xeerka way ku yaallaan. Haddii wax elektaroonig ah la xado, xeerku wuu tilmaamayaa sida loo baadhayo iyo xukunkiisaba. Dhinaca kale, marka laga hadlayo ilaalinta iyo kaydinta xogta (data), xeerka kale ee Data Protection Act-ka ayaa ka hadlaya, kaas oo aad muhiim u ah.

Maanta dalka waxa laga ururiyaa xog aad u badan, aduunkana waxa ugu qaalisan waa xogta iyo macluumaadka. Xogtaas dalka laga ururiyo badanaa waxa lagu kaydiyaa server-ro ku yaalla dibadda. Sidaas darteed, in biometric data la qaato oo meel kale la geeyo, ama ganacsi online ah ha ahaado ama mid kale, oo xogta dalka laga saaro lana dhigo dal kale, xeerarkani waxay caddeynayaan inay dembi tahay. Lama ururin karo xog, lama qaadi karo biometric data, lamana samayn karo sahanno (survey) iyada oo aan oggolaansho laga helin hay'adaha ay khusayso, kuwaas oo ugu horreeya haddii ay elektaroonig tahay Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyada, maaddaama ay iyadu masuul ka tahay wixii elektaroonig ah ee dalka. Waxa kale oo ku xiga wasaaradaha kale ee ay xogtu khusayso.

**Md. Cabdiraxmaan Badheedha – Su'aal:** Wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta waa nin dhalinyaro ah oo firfircoon, sida uu sheegayona jiilka dambe ayay muhiim tahay in lala jaanqaado. Maaddaama xeerkan iminka naloo keenay oo aanan weli ka bogan, su'aal guud oo ku saabsan isgaadhsiinta ayaan doonayaa inaan ku waydiiyo si aan u fahmo.

Baarlamaan ahaan, waxaanu nahay hay'adda ilaalisa dakhliga dalka, cashuuraha soo gala iyo sida loo maamulo. Caalamka, marka qaran jiro waxa la siiyaa code, ha ahaato isgaadhsiin ama hawada. Waa meelaha lacagtu ka soo gasho. GSM-ku adduunka waa mid qaali ah, dawladuhuna cashuur badan ayay ka helaan. GSM-keena innaga miyaa la iska furtay? Maxaase innaga soo gala?

**Wasiirka Isgaadhsiinta Md. Axmad Yuusuf – Jawaab:** Marka laga hadlayo shirkadaha isgaadhsiinta, Wasaaraddu waxay ka qaaddaa cashuuro kala duwan; sida cashuurta ruqsadda (license) oo sannadle ah, cashuurta frequency-ga, iyo cashuurta Goods and Services Tax (GST). Wasaaraddu waxay haysataa qalab loogu talagalay in shirkadaha lagu xiro nidaamkaas, balse nasiib darro ilaa hadda si buuxda looma hirgelin sababo jira awgood.

Intii aan joogay, waxaanu kordhinay cashuurahaas. Anagoo la kaashanayna Wasaaradda Maaliyadda, waxaanu gaadhnay korodh dhan 80%. Maaddaama system-kii aanu weli si buuxda u shaqayn, aniga iyo Wasiirka Maaliyaddu waxaanu isla qaadanay in cashuuraha kale la kordhiyo. Sidaas ayaanu ku gaadhsiinay heer wanaagsan cashuurta GST-ga saddexda shirkadoodba, ha noqoto ku shubashada, internet-ka, flat rate ama post-paid. Shirkaduhuna way naga aqbaleen, inkasta oo system-ku aanu weli si buuxda u xidhmin.

**Md. Sh. Siciid Sokeeye – Su'aal:** Mudane Wasiir, aad baad ugu mahadsan tahay imaatinkaaga. Mawduuca aynu ka hadlaynaa waa dambiyada cybercrimes. Waxa jira hay'ado nabadgelyo oo arrintani muhiim u tahay, sida Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Booliiska iyo qaybta dambi-baadhista, waana inay hormuud ka noqdaan dambiyada elektaroonigga ah. Waxaan ognahay inaanay weli si buuxda ugu carbisanayn.

Mudane Wasiir, intee in le'eg ayaad u qorshaysaan ama aad hore ugu samayseen iskaashi dhinaca criminology-ga ah hay'adaha qaabilsan dambiyada? Intee in le'eg ayaad u malaynaysaa in dalkeennu u diyaarsan yahay inay si caddaalad ah uga garsooraan dambiyada elektaroonigga ah?

**Md. Cali Beegsi – Su'aal:** Marka hore Wasiirka waan salaamayaa. Xeerkan maanta horteenna yaalla waa mid ka mid ah xeerarka ugu muhiimsan adduunka xilligan, waddankeenuna baahi weyn buu u qabaa, maaddaama uu saamaynayo qof kasta, yar iyo weynba.

Mudane Wasiir, Qodobbada 6aad iyo 7aad ee xeerku waxay sheegayaan in Wasaaraddu ka masuul tahay dhinaca qalabka, xeer-nidaamiyeyaasha iyo siyaasadaha. Sida aynu ognahay, dhawaan waxa la jabsaday (hacker-gareeyay) website-kii Wasaaradda Isgaadhsiinta. Sidoo kale, account wasiirku lahaa ayaa mid kale laga sameeyay oo sawirkiisii iyo magaciisii la isticmaalay. Sidaan ogahay, arrimahaas wax badan lagama qaban, waxaana lala xidhiidhay shirkadaha, dhibaatadiina way sii socotay.

Haddaba, intee in le'eg ayaad awood ugu leedihiin Wasaarad ahaan la-tacaalidda arrimahaas? Awooddaas ma leenahay mise ma lihin? Shirkadaha marka ay dal soo galayaan, caalamka heshiis baa lala gala si loola xisaabtamo haddii ay dhibaato geystaan. Shirkadahaas heshiis ma la geli kartaan? Sideese Wasaaraddu muwaadiniinta u ilaalin kartaa?

**Wasiirka Isgaadhsiinta Md. Axmad Yuusuf – Jawaab:** waad mahadsan tihiin, hadaan su'aalaha labada mudane ka jawaabo. Horta lalama wareegin website Wasaaradu leedahay ee Facebook buu ahaa, facebook-gaasna markii hore looma samayn verification, dadka kale ayaana gacanta ku hayay, laakiin muddo dheer ka dib facebook-gii hawada waa laga saaray. Wasaaradu waxay masuul ka tahay wax la yidhaahdo e-government, haday noqoto Emails, facebook-yada Wasaaradaha oo verification wada haysta, hadii email Wasaaradeed la hack-gareeyo maalmaanu ku soo elinaynaa oo dhamaan accounts hay'addaha dawlada Wasaaradaa gacanta ku haysa.

Tan kale, marka cybercrimes laga hadlayo hay'adduhu way kala qaybsan yihiin, anagu sharciyan baadhitaan baanu leenahay, hay'addaha Kalena waxay leeyihiin fulintii, haday sirdoonka noqoto, haday ciidamada bilayska noqoto, laakiin inaanu baadhno oo cadayno Wasaarada iska leh, legal framework-gii lagu xukumayayna sharciyan marka dambi dhaco wasaarad ahaan anaga baadhayna iyadoo sirdoonka qaybta cybercrimes-ka anagoo kaashanayna. Hada waxa la dhisayaa xafiiskii cyber-ka, sida xeer-nidaamiyaha ku qorana waa in Wasaaradu cadayso siday u dhaceen marka uu dhaco dambi cyber ah.

Shaqaalaha Wasaaradu 80% waa dhalinyaro IT ah oo awood u leh inay baadhaan wixii cybercrime dhaca oo ay warbixin ka soo saaraan, ka dibna, la wadaagaan hay'addaha ay khusayso oo ah ee fulinta dambiyada dhaca.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| --------------------------------------------------- | ------------------------------------------- |